Ku dhaqan Xafiis D.


# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

# OFFICIAL BULLETIN

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 4aad** **FAAFIN SANADLE** **Muqdisho** **2016**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**


**Uruurinta Sharciyada iyo Wareegtooyinta ee Jan-December 2016**


Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.
Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.


# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

W.M

## BOGGA LABAAD

XEER

## BOGGA SEDDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

# SANADKA

# 2016

**XEER RA'IISUL WASAARE Lr. 927** Taariikh: 18/02/2016

**Go'aan Gole "Ansixinta Qaab-siyaasadeed lagu hawl-gelinaayo Ururka Dhaq-dhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed"**

## RA'IISULWASAARAHA XUKUUMADDA JFS

**Markuu arkay:** Qodobka 99aad, (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka JFS.

**Markuu arkay:** Qodobka 100aad, (a), iyo (d) ee Dastuurka.

**Markuu arkay:** Warqadda Soo Jeedinta Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha ee summaddeedu tahay **00644/WGW/16** ee **23/ 0/2016**, kuna saabsan **Dib-u-hawl gelinta Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed** (UDHIS).

**Markuu arkay:** Go'aanka Golaha Wasiirrada ee Summaddiisu tahay **SHGW.00.57.02.16** ee **18/02/2016**, kuna saabsanaa ansixinta **"Qaab-siyaasadeedka lagu hawl-gelinaayo Ururka dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed (UDHIS)'** oo Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Markuu Tixgeliyay:** Baahi loo qabo iyo muhiimadda dhaqaale ee Iskaashatooyinku u leeyihiin Dalka iyo Dadka.

### Wuxuu Xeeriyay

### Qodobka 1aad

Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.57.02.16** ee **18/02/2016**, kuna saabsanaa ansixinta **"Qaab-siyaasadeedka lagu hawl-gelinaayo Ururka dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed (UDHIS)"** oo Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

## Qodobka 2[aad]

Qaab-siyaasadeedka lagu hawl-gelinaayo **Ururka Dahq-dhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed (U.DH.I.S.)** marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Jamhuuriyadda Fed. Somaliya
Hantidhowrka Guud
Galid
No. 180
TR. 19/05/2016
Saxiix.

# QAAB-SIYAASADEED

QAAB-SIYAASADEEDKA

LAGU HAWL-GELINAYO

URURKA DHAQDHAQAAQA

ISKAASHATOOYINKA SOOMAALIYEED

(UDHIS)

**Hordhac & Tixraac:**

**MADAX-BANNAANIDA IYO HORUMARINTA URURKA DHAQDHAQAAQA ISKAASHATOOYINKA SOOMAALIYEED 'UDHIS'**

**1) Madax-bannaanida Ururka (8 Oktoobar 1979 - Sharci Lr. 41)**

Qodobka 1aad, Faqradiisa 2: (Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed waa Urur dhaqaale iyo bulsho oo madax-bannaan, wuxuuna leeyahay shakhsiyad sharciyeed)

**2) Horumarinta Sharciga Ururka ee (18 Maarso 1980 –Sharci Lr.9) Faafintiisa Rasmiga ah ee Madaxtooyadana ay soo baxday: Muqdisho, 29 Maarso 1980 – Lr. 2R3**

Qodobka 1aad Faqradiisa 1: Ayadoo Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed uu xil ka saaran yahay in uu kulmiyo, ururiyo, maamulana dhammaan Iskaashatooyinka dalka, waxaa awoodii Wasaaraddaha ay ku lahaayeen Iskaashatooyinka, ee ku tilmaamnaa Sharci Lr. 40 ee soo baxay 4.10.1973 – lagu wareejiyey Ururka UDHIS.

Qodobka 1aad Faqradiisa 2: Sidaas daraadeed wixii qalab, farsamo iyo Shaqaalaba ee la xiriira Iskaashatooyinka ee hoos imaanayey Wasaaraddaha waxaa lagu wareejiyey Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed

Qododka 2aad: Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed wuxuu awood u leeyahay inuu si toos ah u dhoofiyo xoolaha iyo badeecadda ay soo saaraan Ishkaashatooyinka isagoo la kaashanaya Hay'adaha Dawladda ee ku shaqada leh ganasiga iyo dhoofinta badeecada.

**Tusmo:**


| | |
|---|---|
| Qodobka 1aad: | Eray-bixin iyo Astaanta Ururka |
| Qobobka 2aad: | Sharciga Dhismaha Ururka |
| Qodobka 3aad: | Iskaashatooyinka Xubnaha ka ah Ururka |
| Qodobka 4aad: | Xarunta iyo Laamaha Ururka |
| Qodobka 5aad: | Ujeeddooyinka Ururka |
| Qodobka 6aad: | Higsiga Ururka |
| Qodobka 7aad: | Abaabulka Hawlaha Ururka |
| Qodobka 8aad: | Hantida Ururka |
| Qodobka 9aad: | Shirka Guud ee Ururka UDHIS |
| Qodobka 10aad: | Guddiga Qaran |
| Qodobka 11aad: | Guddiga Fulinta |
| Qodobka 12aad: | Guddiga Dastuurka & Xallinta Khilaafaadka UDHIS |
| Qodobka 13aad: | Guddoonka |
| Qodobka 14aad: | Guddoomiyaha UDHIS |
| Qodobka 15aad: | Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad |
| Qodobka 16aad: | Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad |
| Qodobka 17aad: | Xoghayaha Joogtada |
| Qodobka 18aad: | Waaxda Arrimaha Dibadda |
| Qodobka 19aad: | Waaxda Abaabulka & Arrimaha Bulshadda |
| Qodobka 20aad: | Waaxda Waxbarashada & Tababar-xirfadeedka |
| Qodobka 21aad: | Waaxda Diiwaan-gelinta & Shuruucda |
| Qodobka 22aad: | Waaxda Qorsheynta, Tiro-koobka & Suuq-geynta |
| Qodobka 23aad: | Waaxda Maamulka Maaliyadda, Shaqaalaha & Amaahda |
| Qodobka 24aad: | Waaxda Dib-u-dejinta iyo Taakuleynta |
| Qodobka 25aad: | Wakaaladaha Hoos yimaada UDHIS |
| Qodobka 26aad: | Shirkadaha Maal-gelintoodu Wadajirka tahay |
| Qodobka 27aad: | Guddiga Kormeerka & Hanti-dhawrka |
| Qodobka 28aad: | Faa'iidada U.DH.I.S. |
| Qodobka 29aad: | Abaal-gud |
| Qodobka 30aad: | Dhismaha Bankiga Keydka & Amaahda UDHIS |
| Qodobka 31aad: | Dhaqan-gal |

## QAAB-SIYAASADEEDKA UDHIS

### Qodobka 1^aad
### Eray-bixin iyo Astaanta Ururka

**Iskaashato:** waa Urur Dhaqaale-Bulsho-Wax-soo-saar, oo kaalin buuxda kaga jira kobcinta iyo dhismaha dhaqaalaha dalka. Waana Urur ay ku mideysan yihiin kuna bahoobeen saamiley iyo xirfadley oo maskaxdooda, maalkooda iyo muruqooda maalaya, Ururkaas oo ku dhisan mabaadi'da guud ee Iskaashatooyinka Aduunka oo ah: **b)** Xubinmo xor ah; **t)** Ilaalinta Xaqsoorka, Codeynta iyo Maamulka (Hal qof, Hal cod); **j)** Xaddidaada Dulsaarka Hantida; iyo **x)** Qeybinta Faa'iidada si Cadaalad ah (kuna salaysan saamiga).

**U.DH.I.S.:** waa qoraal loo soo gaabiyey Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed.

**Astaanta Ururka:** waa wareeg ay ku gaadaaman yihiin caleemo matalaya Beeraha, calaamad matalaysa warshadaha, sawir geel, kalluun, badeel, iddin, waxaana ugu sarreeya xidig shan-gees ah, oo hoostana uga dhigan tahay qoraalka U.DH.I.S. ee loo soo gaabshay Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed.

### Qodobka 2^aad
### Sharciyeynta Dhismaha Ururka UDHIS

1) Waxaa la Sharciyeeyey oo la aasaasay Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed **8^dii Janaayo 1978**, ayadoo lagu saleynayo Sharcigii Iskaashatooyinka ee Sharci Lr.40 ee soo baxay 4^tii Oktoobar 1973, kadibna laga sii ambaqaadayo Sharcigii xigay ee dib-u-eegista ee Sharci Lr.41, ee 8^dii Oktoobar 1979 iyo midkii Sharcigii dambe ee lagu horumarinayey ee ahaa Sharci Lr.9 ee 18.03.1980.

2) Ururka Dbaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed waa Urur dhaqaale & bulsho oo madax-bannaan, wuxuuna leeyahay shakhsiyad-sharciyeed.

3) Ayadoo laga ambaqaadayo Sharci Lr.9, ee 18 Maarso 1980 ee lagu horumariyey Sharci Lr.41 ee Ururka UDHIS, isla markaana la eegayo Qododka 2aad ee Sharcigaas Sharci L.9, ee qoraya "*Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed wuxuu awood u leeyahay inuu si toos ah uu u dhoofiyo xoolaha iyo badeecadda ay soo saaraan Ishkaashatooyinka isagoo la kaashanaya Hay'adaha Dawladda ee ku shaqada leh Ganasiga iyo Dhoofinta badeecada*", ayaa Ururka UDHIS wuxuu garwaaqsaday in ay Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha ee Xukuumadda JFS ay noqoto Wasaaradda uu UDHIS la yeelanayso 'Gacan-saar Wada-shaqeyn', ayadoo Ururka UDHIS u hoos-imaanayso Wasaaradda arrimaha soo socda:

**b)** In ay Wasaaraddu kor-joogteyn ku yeelato Ururka, isla markaana ay gacan ka siiso Ururka UDHIS sidii Qaab-siyaasadeedkan uu Golaha Wasiirradu ku meel-marin lahaa, iyo in Wasaaradu si joogto ah uga difaacdo UDHIS su'aalaha iyo weydiimaha kaga iman kara Goleyaasha Dawladda; iyo

**t)** In Wasaaraddu ka taageeerto Ururka UDHIS xaaladaha degdega ah ee Ururka ka soo wajihi kara dhinacyada: **i)** Is-maandhaafka iyo su'aalaha ay soo weydiin karaan Wasaaraddaha kale ee Xukuumadda ee uu Ururku la- wadaago Istraatijiyad iyo Hadaf shaqo; iyo **ii)** Arrimaha ganacsiga dibadda, sidii ay markasta "U-qeybsanayaasha Ganacsiga" (Commercial Attachees) ee Wasaaradda, ay gacan buuxda uga siin lahaayeen Ururka UDHIS hadafkooda ganacsi ee dibadda, iyo xaalad kasta ee ganacsiga dibadda khuseysa haddii ay la soo gudboonaato Ururka UDHIS.

## Qodobka 3$^{aad}$
## Iskaashatooyinka Xubnaha ka ah Ururka UDHIS

Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed waa Urur Dhaqaale iyo Bulsho ee ugu sarreeya Iskaashatooyinka dalka, waxaana ka hoos farcama 6 (lix) Urur-Iskaashatooyin oo kale ah:

1) Iskaashatooyinka Beeraha;
2) Iskaashatooyinka Kalluumaysiga;
3) Iskaashatooyinka Xoolaha, Keymaha iyo Xijiga;
4) Iskaashatooyinka Gaadiidka iyo Dhismaha;
5) Iskaashatooyinka Warshadaha iyo Farshaxanka; iyo
6) Iskaashatooyinka Quudka iyo Adeegga

Waxaa kale oo Ururka UDHIS Xubin ka noqon kara, Iskaashato kasta ee dalka ka dhisanta, ee soo buuxisa shuruudaha iyo xeer-hoosaadka u degsan Ururka UDHIS. Waxaana laga qeyb-gelinayaa dhammaan qeybaha kala duwan ee dalka Soomaaliya.

## Qodobka 4$^{aad}$
## Xarunta iyo Laamaha Ururka

Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed marka la soo gaabshana loo yaqaano «U.DHI.S.» waxay xaruntiisa rasmiga ahi noqoneysaa Magaalo-madaxda Muqdisho, wuxuuna Laamo ku yeelan karaa dhammaan Gobollada, Degmooyinka iyo Tuulooyinka Dalka ama Dalka dibaddiisa.

## Qodobka 5$^{aad}$
## Ujeeddooyinka Ururka

Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed waa Urur Dimoqraadiyad iyo cadaalad ku dhisan, wuxuu kulmiyaa dhammaan Iskaashatooylnka Soomaaliyeed nooc kasta oo ay yihiin, waxayna hawlihiisu noqonayaan kuwa soo socda:

1) Daryeelidda, badbaadinta iyo horumarinta danaha xoogsatada Soomaaliyeed guud ahaan, gaar ahaana Xubnaha ku bahoobay Ururka Iskaashatooyinka UDHIS.

2) Kobcinta dhaqaalaha Iskaashatooyinka, hoggaaminta iyo kormeeridda qorshaha wax-soo-saarka, isu-dheellitirka bedeecadda iyo maal-gelinta sanadaha soo socda, si Iskaashatooyinka xubnaha ka ah Ururka UDHIS ay u gaaraan isku-filnaansho degdeg ah.

3) Adkaynta Maamul-wanaagga Iskaashatooyinka, kor-u-qaadista garaadka siyaasadda, aqoonta, teknoloojiyada iyo xirfadda Shaqaalaha Iskaashatooyinka.

4) Soo-saarista Xeer-hoosaadyo iyo Xeerar-nidaamiyeyaal kale oo gaar ah ee lagu nidaamiyo Iskaashatooyinka Soomaaliyeed, si hore loogu wado horumarka iyo kaalmeynta Maamulada Iskaashatooytnka, Ururinta, diiwaan-gelinta iyo dhiirri-gelinta Xoogsatada iyo Xirfadleyaasha kala duwan si ay uga faa'iideystaan maskaxdooda iyo muruqooda

5) Wuxuu Ururku u fidinayaa Iskaashatooyinka tababaro gudaha iyo dibaddaba, wuxuuna raadinayaa Amaahyo Maal-gelin si ay sare ugu qaadaan wax-soo-saarkooda, iyo sidoo kale deeqo dhaqaale ee kaabaya kharashaadka ka geli kara tacab-gelintooda gudaha, ama haddii ay dhacdo in aafooyinka dabiiciga ah u geystaan khasaarooyin tacabkooda wax-soo-saar.

6) Wuxuu Ururku u sameynayaa Iskaashatooyinka Xeer-hoosaadyo abaal-marinaya ama ganaaxaya Iskaashatada, si loo adkeeyo cadaaladda, xaq-soor wax-ku-'qeybinta iyo daryeelka xuquuqda shaqaalaha Iskaashatooyinka.

7) Wuxuu diiwaan-gelinayaa dhammaan Iskaashatooyinka iyo

hantidooda, wuxuuna kormeerayaa hab-sami-u-fulinta hawlaha Iskaashatooyinka ee ku saleysan Xeerarka, Qorsheyaasha iyo Hegsiga u degsan Ururka UDHIS.

8) Wuxuu dib-u-habayn ku sameynayaa Iskaashatooyinka hawshooda gudan waaya, asagoo u magacaabaya Saraakiil soo baara sababaha keenay hakadka iyo dib-u-dhaca Iskaashatadaa, dabadeedna wuxuu Ururka ku xalinayaa caqabadaha jira qaabka ugu haboon ee ay Xubnaha Ururka intooda badan ay isku raacaan (cod-bixin dhan 2/3 Xubnaha fadhigu ku guntamay).

9) UDHIS wuxuu Iskaashatooyinka wakiil uga yahay arrimaha dibadda iyo maamul-goboleedyada dalka.

## Qodobka 6aad
## Hiigsiga Ururka

1) Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed asagoo ka shidaal-qaadanaya Barnaamijyada dhaqaale-kobcin ee Dowladda ee lagu horumarinayo wax-soo-saarka dalka, ayuu u tayeynayaa una habeynayaa Iskaashatooyinka qaab-dhismeed casri ah oo la jaan-qaadi kara barnaamijyada dhaqaale-kobcin ee Aduun-weynaha.

2) UDHIS wuxuu u abaabulayaa Iskaashatooyinka sidii ay kaalin muuqata uga qaadan lahaayeen dib-u-dhiska dalka qeybahiisa kala duwan.

3) UDHIS si uu ugu guuleysto barnaamijyadiisa dhaqaale iyo kobcinta Iskaashatooyinkiisa wuxuu xoojinayaa xiriirka iskaashi ee dhexdooda yaala, iyo kuwa ay la leeyihiin Ururada Bulshadda Caalamka (ICA), kuwa Carabta, Urur- goboleedka Iskaashatooyinka Bariga iyo Bartamaha Afrika, iwm.

4) UDHIS si uu u gaaro ujeeddooyinkiisa dhow iyo kuwiisa fog wuxuu isku baadi-goobayaa xubnihiisa, hantidiisa (guurtada & ma-guurtada) ee kala lumay.

5) Isagoo ka faa'iideysanaya waaya-aragnimadiisa uu kaga hortagi karo nadaam-xumadii adeegsiga kaalmada caalamiga, ayaa wuxuu u hawl-gelayaa sida ugu haboon oo ay xubnaha Iskaashatooyinku uga faa'iideysan karaan kaalmadaas.

6) UDHIS asagoo rumeysan in saldhigga horumarinta bulshadda uu yahay tacabka wax-soo-saarka, wuxuu waajib iskaga dhigayaa kordhinta wax-soo-saarka beeraha, kalluunta, xoolaha, farshaxanka iyo warshadaha yaryar, iwm.

## Qodobka 7$^{aad}$
## Abaabulka Hawlaha UDHIS

Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed wuxuu si gaar ah, oo madax-bannaan u abaabulayaa hab-sami-u-sucodka hawlaha Iskaashatooyinka ku bahoobay UDHIS, wuxuuna leeyahay Barnaamijyo Iyo Xeerar muujinaya himilada guud, qaab-dhismeedka Iskaashatooyinkiisa iyo habka Maamulka iyo Maareynta hawlahooda maalinlaha ah. Waxaana hawlahaas kamid ah:

1) Dhinaca Beeraha:

b) Ururka wuxuu hawl-gelinayaa kuna boorinayaa xubnihiisa Iskaashatooyinka Beeraha sidii kor loogu qaadi lahaa wax-soo-saarka Hiktarlaha ah, tusaale: haddii markii hore laga soo saari jiray 8-12 Kiintaal/Hiktarkii oo galey ah, in la gaarsiiyo 50-60 kiintaal/Hiktarkii iyadoo la adeegsanayo nidaamka dhul- diyaarinta (geed-qaadista) casriga ah iyo nafaqeyntiisa;

t) Ururku wuxuu abaabulayaa kana shaqeynayaa sidii dib loogu hawl-gelin lahaa kanaaladii waaweynaa ee duugmay. Isagoo Ururku la-kaashanaya Wasaaradda Beeraha iyo Hay'adaha Caalamiga ah, sida Hay'adda Cuntada & Beeraha (FAO), waxaa kale oo Ururku xoogga

saarayaa sidii loo qodi lahaa wabiyada, isla markaana loogu sameyn lahaa biyo-mareeno (kanaalo), si Beeraleyda looga badbaadiyo fatahaadaha webiyada iyo daadadka biyo-roobaadka ee buux-dhaafiya webiyada;

j) Ururku wuxuu ku dadaalayaa in uu u helo Iskaashatooyinka Beeraha tababaro dibadda, abuur daaweysan iyo qalabka casriga ah ee dhul-diyaarinta, geed-qaadka, goynta iyo finjilkaba, si looga hortago cunto-lumista iyo dib-u-dhaca soo wajihi kara wax-soo-saarka dhinaca beeraha.

**2) <u>Dhinac Kalluumeysiga:</u>**

b) Waxaa baaba'ay qalabkii kalluumeysiga iyo hamigii Kalluumaysatadu lahayd. Waxaa misena sii cirib-tiray Maraakiibta shisheeye ee sida sharci-darada ah uga kalluumeysanaya badaheena (Badda Cas & Badweynta Hindiya). Waxaa kaloo u dheer Kalluumaysatadeena inay culeys hor leh ay kala kulmaan Maraakiibta dagaalka oo dhinacna kala dagaalamaya Burcad-badeeda, dhinaca kalena ku fiirsanaya Maraakiibta shisheeye in ay si sharci-dara ah uga kalluumaystaan badaheena. Waxaa la lunsaday qalabkii bariga looga shaqeynayey kalluunka sida keydintiisa kala duwan;

t) UDHIS wuxuu ka shaqeynayaa sidii Iskaashatooyinka kalluumeysiga u heli lahaayeen Qaboojiyayaal, doomo, qalab kalluumeysi oo casri ah iyo qaababka kale ee keydinta kalluunka; iyo

j) UDHIS wuxuu keenayaa Istaraatijiyada iyo habka ugu sahlan ee loo suuq-geyn karo kalluunkeena. Ururku wuxuu raadinayaa dariiq walba oo ay Iskaashatooyinka Kalluumeysiga uga faa'iideysan lahaayeen dhammaan kheyraatka badda ku jira, wuxuuna ka kaalmeynayaa dhinacyada farsamada, maamulka, iwm.

**3) Keymaha iyo Xoolaha:**

b) UDHIS wuxuu ka-hortagayaa xaalufinta degaanka iyo nabaad-guurintiisa, wuxuuna ku dadaalayaa dhismaha Iskaashatooyirika nooca cusub ah ee isku-dhafka xoolaha iyo beeraha, wuxuuna qaabeynayaa ka-faa'iideysiga dhirta, isagoo la kaashanaya Hay'adaha Dhirta iyo Daaqa, iyo Madaxda Degaanada ee Gobolada iyo Degmooyinka dalka; iyo

t) Wuxuu qorshe jaan-go'an iyo siyaasad hufan u dejinayaa Shidida Dhuxusha iyo ka-ganacisigeeda.

**4) Farshaxanka iyo Warshadaha yaryar:**

b) Intii ay socdeen dagaaladii sokeeye waxaa burbur iyo boob ku yimid qalabkii lagu sameynayey farshaxanka iyo dharka Aliindiga iyo dhammaan hantidii xubnaha Iskaashatooyinka Aliindiga, sidaas awgeed, UDHIS wuxuuu talaabo ka qaadayaa sidii ay u heli lahaayeen qalabkii farsamo iyo hoosooyinkii ay ku shaqeyn lahaayeen xubnaha Iskaashatooyinka Aliindiga, kuwa farsamada dahabka iyo qalinka, iwm;

t) Ururku wuxuu isku ururinayaa xooggii dhalinyarada iyo waaya-aragnimada odayaasha ka soo jeeda Iskaashatooyinka Farshaxanka, isagoo kor u qaadaya tayadooda waxbarasho iyo farsamo; iyo

j) Ururku wuxuu waajib weyn iska saarayaa ilaalinta iyo kordhinta waxyaabihii ummadda Soomaaliyeed ay hidaha iyo dhaqanka u lahaayeen.

**5) Quudka iyo Adeegga:**

b) UDHIS wuxuu mas'uuliyad balaaran iska saari doonaa soo-saarka

iyo ganacsiga quutul-daruuriga, oo ay dadku u baahan yihiin, sida hilibka iyo khudaarta, oo lagama-maarnaan u ah nolosha bani'aadamka, wuxuuna xoogga saari doonaa arrimaha 'fayo-dhawrka iyo tayada' iyo in guud ahaan nadaafada, si caafimaadkoodu u noqdo mid la isku halayn karo;

t) UDHIS wuxuu ka shaqeynayaa sidii dib loogu hawl-gelin lahaa, looguna heli qalab casi ah dhammaan Kawaanada iyo Suuqyada Khudaarta, sida Kawaanada Gawraca, iwm. si loo ihelo hilib iyo khudaar nadiif ah, asagoo la kaashanaya Mas'uuliyiinta ku hawlan arrimahaas, heer gobol iyo heer degmo. Haddii ay noqon lahayd Magaalada Caasimada ee Muqdisho, Ururka wuxuu arrimahan kala tashan doonaa Duqa Magaalada Muqdishu iyo dhammaan Guddoomiyayaashiisa Degrmooyinka ee Gobolka Banaadir ka kooban yahay;

j) Ururku wuxuu ku dadaalayaa wax-ka-bedelka nolosha xubnaha Iskaashatooyinka Muruqmaalka, Tayada badeecadaha ay ka ganacsadaan iyo hufnaanta adeegyadoodaba.

**6) Gaadiidka iyo Dhismaha:**

b) Waa Iskaashatada ugu waxqabadka badan marka laga hadlayo Iskaashatooyinka kale hoos yimaada Ururka UDHIS. Iskaashatadan ayaa misena ugu baahi badan marka laga eego dhinacyada: dhibaatada ka heysata qalabka dayactirka gaadiidkooda iyo hoosada loogu shaqeyn lahaa kuwa jaba, ama cilad'bixinta u baahan, iwm;

t) UDHIS wuxuu ka shaqeynayaa siyaabaha ugu haboon in lagu dhisi karo "Ceymis Gaadiid' ee loogu tala-galay Iskaashatooyinka Gaadiidka, oo uu gaar u leeyahay UDHIS, isla markaana lagu difaaci karo xuquuqdooda dhinaca shilalka, dhaca iyo boobka, looguna fidin karo kaalmooyin haddii ay aafooyin dabiici ah ay ku timaado xubnaha Iskaashatadaas;

j) UDHIS wuxuu u duubanayaa sidii loo dabooli lahaa baahida xubnaha Iskaashatooyinka Gaadiidka iyo Dhismaha isagoo la kaashanaya Wasaaradda Gaadiidka, Guddiga Gaadiidka ee Baarlamaanka Federaalka iyo dhammaan Laamaha iyo Hay'adaha Dawliga ah ee ku shaqada leh hawlaha gaadiidka; iyo

x) Ururka UDHIS, sida Iskaatatooyinka kale ee aan kor ku soo xusnay, wuxuu ku dhaqayaa Iskaashatooyinka Gaadiidka iyo Dhismaha, kuwa soo saara, jaayga, nuuriyada iwm Xeer-hoosaadyada iyo Xeer-nidaamiyeyaasha u degsan Ururka ee uu Guddiga Fulinta kula xisaabtamayo sida kuwa kaleba.

## Qodobka 8aad
## Hantida Ururka

Hantida Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed waxay ka kooban tahay, oo ay ka imaanaysaa ilaha hoos ku xusan::

1) Hantidii hore ee UDHIS;
2) Khidmadaha soo-gelintaanka iyo dhigaalka ay xubnaha Iskaashatooyinka bixiyaan;
3) Hantida Wakaaladaha iyo Shirkadaha hoos yimaada UDHIS;
4) Kaalmada ay Ururada Caalamiga u fidiyaan UDHIS;
5) Kaalmada uu Ururka ka helo dawladda Soomaaliya kadib codsiga baahida uu soo gudbiyo UDHIS;
6) Dakhliga ka soo gala saamiyaasha uu UDHIS la wadaago Iskaashatooyinka, Ururrada iyo Shirkadaha uu heshiisyada la galo, dalka gudahiisa iyo dibaddaba;
7) Khidmadaha soo-gelitaanka iyo dhigaalka xubnaha Iskaashatooyinka ay bixin doonaan waxaa lagu qeexayaa Xeerar uu soo saaro UDHIS; iyo
8) Wixii Faa'iido uu ka helo ganacsiga uu sameeyo UDHIS.

Waxaa xusid mudan, in UDHIS uusan marnaba culeys ku soo kordhin bulshadda balse uu waxtar muuqda u noqdo kobcinta dhaqaalaha dalka.

## Qodobka 9aad
## Shirka Guud ee UDHIS

Shirka Guud ee UDHIS waa awoodda ugu sarreysa ee Ururka, wuxuuna dhacaa 5 (shan) sanoba mar, wuxuuna ka kooban yahay ergooyin ay soo xushaan dhammaan Iskaashatooyinka hoos yimaada UDHIS, kana soo xuleen Iskaashatooyinka saamilayda ah ee heer gobol, heer dagmo, iyo heer Iskaashataba. Shirka Guud ee UDHIS wuxuu doortaa Golaha Qaranka ee Iskaashatooyinka, waxaana intaa dheer:

1) Shirka Guud ee UDHIS wuxuu wax ku kordhiyaa ama wax ka bedelaa Xeerarka iyo Barnaamijyada Ururka.

2) Shirka Guud wuxuu oggolaadaa qorshaha 5ta (shanta) sano ee Ururka.

3) Shirka Guud ee aan caadiga ahayn waxaa la qaban karaa markii la helo qodobada hoos ku qoran:

   **b)** Kala-bar (1/2) Iskaashatooyinka heer qaran marka ay codsadaan qabashada Shir Guud; iyo

   **t)** Guddiga Fulinta ee UDHIS markuu iskugu yeero Shirka Guud.

## Qodobka 10aad
## Guddiga Qaran

Guddiga Qaran ee Iskaashatooyinka waxaa doorta Shirka Guud ee 5tii (shartii) sano mar la qabto ama Shirarka aan Caadiga ahayn ee layskugu yeero.

Guddiga Qaranka ee UDHIS waa awoodda ugu sarreysa ee Ururka

muddada u dhexaysa labada Shirweyne, waxayna hawshiisu tahay:

1. Wuxuu doortaa Guddiga Fulinta UDHIS.
2. Wuxuu doortaa Guddiga Dastuurka & Xallinta Khilaafaadka UDHIS.
3. Wuxuu doortaa Guddiga Kormeerka & Hanti-dhawrka.
4. Wuxuu doortaa Guddoomiyaha & labadiisa Ku-xigeen ee UDHIS.
5. Wuxuu oggolaadaa ku-talo-galka miisaaniyadda sanadka.
6. Wuxuu kormeeraa, lana xisaabtamaa Guddiga Fulinta UDHIS.
7. Tirada Guddiga Qaranka waxaa gooya Shirweynaha isagoo tixgelinaya hadba baaxada ay la'eg tahay hawsha UDHIS.
8. Guddiga Qaranka wuxuu kulmaa sanadkiiba mar.
9. Guddiga Qaranka wuxuu awood u leeyahay inuu wax ka bedelo xubnaha Guddiga Fulinta ama wada bedelo markii ay ku cadaato xil-gudasho la'aan ama musuq-maasuq.

**Qodobka 11aad**
**Guddiga Fulinta**

1. Guddiga Fulinta waa awoodda ugu sarreysa ee maamulka hawlaha Ururka UDHIS. Labada kal-fadhi inta u dhexaysa.
2. Guddiga Fulinta wuxuu kulmaa todobaadkii mar.
3. Guddiga Fulinta wuxuu oggolaadaa shaqaalaha la qaadanayo ama la dhimayo, abaal-marinta, dhiirri-gelinta iyo wixii kharashaad kala gedisan ah.
4. Faahfaahinta hawlaha Guddiga Fulinta iyo Xeer-hoosaadyada uu ku shaqeyn doono, waxaa lagu soo saari doonaa Xeer-nidaamiyaha Ururka UDHIS

**Qodobka 12aad**
**Guddiga Dastuurka & Xallinta Khilaafaadka UDHIS**

1. Guddigan waa marjaca kala saaraya, oo xallinaya khilaafaadka soo kala dhex-gala Iskaashatooyinka Soomaaliyeed ee ku bahoobay Uruka UDHIS. Guddiga waxaa goor kasta ee loo

baahdo isugu yeeraya Guddoomiyaha iyo Labadiisa Ku-xigeeno.

2. Guddiga wuxuu kaloo difaacayaa danaha iyo higsiga UDHIS iyo khalad ama fara-gelin kasta ee ka soo wajahda Ururka dibadiisa.
3. Guddiga wuxuu isku keenayaa Xeel-dheereyaal ka fadhiista dhacdo kasta ee lasoo gudboonaata Ururka, ayagoo talo urursan ka siinaya Guddoonka, Guddiyada, Guddoomiyaha iyo Labadiisa Ku-xigeeno.
4. Guddiga wuxuu isku keenayaa La-taliyayaasha dhinacyada sharciga, beeraha, kalluumaysiga, quudka iyo adeega, warshadaha, ganacsiga iyo maal-gelinta, gaadiidka, nidaamka ceymiska, farsamada gaadiidka, iwm.
5. Guddiga wuxuu diyaarinayaa wixii Xeer-hoosaadyo ah, ee uu Ururku g'oaansado Shirweynahiisa Guud, Isla markaana wuxuu dib-u-eegis ku sameynayaa Heshiisyada uu Ururku la gelayo Hay'adaha dawliga iyo kuwa caalamiga, shirkadaha maal-gashadayaasha shisheeye iyo bankiyada. Wuxuuna si gaar ah uu ula shaqeynayaa Waaxda Shuruucda, Heshiisyada iyo Diwaan-gelinta.
6. Guddiga wuxuu diyaariyey 'Qaab-siyaasadeedkan' ee dib loogu hawl-gelinayo UDHIS.

## **Qodobka 13$^{aad}$**
## **Guddoonka**

Dhammaan Shirweynaha UDHIS, Shirka Ururada Qaranka ee Iskaashatooyinka, Shirka Guddiyada Fulinta iyo Dastuurka, iyo Shirarka kala duwan ee Iskaashatooyinka wuxuu Guddoonkoodu ku ansaxayaa aqlabiyad Cod Hal-dheeri ah, hase heeshee wixii ku saabsan Xeer wax- ka-dhimid, ama ku daris, ama Xeer sameyn, wuxuu ku ansaxmayaa 2/3 (saddex-meelood laba)

## Qodobka 14^aad

## Guddoomiyaha UDHIS

1. Guddoomiyaha UDHIS waa hoggaanka ugu sarreeya ee arrimaha siyaasadda, dhaqaalaha iyo bulshadda ee UDHIS. Guddoomiyaha wuxuu u wakiilan karaa qaar kamid ah xilkiisa ama hawlahiisa shaqo Guddoomiye-Ku-xigeenada, ama Guddoomiyha Guddiga Kormeerka & Hantidhoorka UDHIS.
2. Guddoomiyaha UDHIS wuxuu hoggaamiyaa hawlaha Guddiga Fulinta, Guddiga Dastuuurka iyo Xallinta Khilaafaadka UDHIS, Guddiga Kormeerka & Hanti-dhawrka UDHIS iyo Ururada Iskaashatooyinka oo dhan.
3. Guddoomiyaha UDHIS wuxuu shir-guddoomiyaa dhammaan fadhiyada Guddiga Qaranka iyo Guddiga Fulinta, iyo Guddiga Dastuuurka iyo Xallinta Khilaafaadka UDHIS. Guddoomiyaha UDHIS wuxuu fuliyaa go'aanada ay gaaraan Guddiga Fulinta ee todobaadlaha ah, kuna qotoma qorshaha Guddiga Qaranka.
4. Guddoomiyaha UDHIS wuxuu wakiil ka yahay dhammaan Guddiyada UDHIS, Iskaashatooyinka iyo Ururadooda ee hoos yimaada Ururka UDHIS, asagoo marna ka baxeeyn go'aanada iyo qorshayaasha kala duwan ee ay gaaraan Shirweynaha.
5. Haddii Xubin Guddiyada kamid ah uu banneeyo jagadiisa si kastaba ha ku dhacdee Xubintaas bedelkeeda waxaa si ku-meel-gaar ah u soo magacaabaya Guddoomiyaha UDHIS.
6. Guddoomiyaha, asagoo la tashanayo Labadiisa Ku-xigeeno, wuxuu magacaabayaa Xoghayaha Joogtada ee Ururka UDHIS, wuxuuna si joogta ah kula xisaatamayaa hawlaha ay qabtaan Waaxyaha ee Xogahayaha Joogtada hoos yimaada, oo qaab-dhismeedooda hoostaga Xafiisyada labada Guddoomiye-Ku-xigeeno.
7. Guddoomiyaha UDHIS wuxuu magacaabi karaa wakiilo UDHIS u jooga dalka dibadiisa kadib markuu arko in kharashka ku baxaya iyo danaha uu fulinayo faa'iido igu jirto Ishaashatooyinka, arrintaana uu ansaxiyaa Guddiga Fulinta.
8. Guddoomiyaha UDHIS waxuu magacaabayaa Guddiga

Abaabulka Dagdaga ee UDHIS, waa Guddiga Go'aan-Gaarista Dagdaga, waxuuna ka kooban yahay todoba xubnood: Gudoomiyaha UDHIS iyo Labada Gudoomiye Kuxigeeno iyo Sadaxda Gudi-madaxeedyo ee kala ah Guddiga Fulinta, Guddiga Hantidhowrka, Guddiga Dastuurka iyo ugu dambeeyn Xoghayaha Joogtada UDHIS. Guddiga waxuu ka jawaabi karaa, diyaarin karaa, ku dari karaa, isla markaana hor'geeyn karaa waxii sharci, xeer-hoosaad, hindiso & xeer-sharciyeed, qaab-siyaasadeed (sida midkan), heshiisyo ama xeer-nidaameed kasta oo ay soo waydiiyaan Golaha Wasiirada, Golaha Shacabka, Madaxtooyada, Xafiiska Raiisul Wasaaraha, Maxkamada Sare iyo kuwa Gobolada, Notaayayaasha, Wasaaradda Ganacsiga & Warsahadaha iyo Wasaaraddaha ama Hay'adaha kala duwan ee dalka, wada-shaqeeynta la yeelan kara Ururka UDHIS.

9. Guddoomiyaha UDHIS wuxuu magacaabi karaa Guddi Anshax-marin oo ka kooban Xubno kamid ah Guddiga Fulinta, Guddiga Dastuuurka & Xallinta Khilaafaadka, Guddiga Kormeerka & Hanti-dhawrka haddii loo baahdo ama ay yimaadaan arrimo xasaasi ah.
10. Guddoomiyaha UDHIS wuxuu bixin karaa bogaadin iyo abaal-marin gaar ahaaneed asagoo ku hadlaya magaca UDHIS.
11. Guddoomiyaha UDHIS wuxuu awood u leeyahay in uu dalacsiiyo ama darajada uu hoos uga dhigo shaqaalaha UDHIS si meel-mar ah.
12. Guddoomiyaha UDHIS waxaa hoos imaanaya ee uu koontaroolayaa Bankiga Iskaashatooyinka, oo xeer-hoosaadkii dib loogu hawl-gelin lahaa lagu hawlan yahay.

**<u>Qodobka 15^aad</u>**

**<u>Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad</u>**

Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad wuxuu guddoomiyaa, ugana wakiil yahay Ururka UDHIS Waaxyaha hoos ku qoran, asagoo u wakiilanayo Xoghayaha Joogtada ee UDHIS, oo ay mas'uuliyadiisa tahay inuu isku agaasimo dhammaan Waaxyahaas, oo kala ah:

1) Waaxda Arrimaha Dibadda
2) Waaxda Waxbarashada iyo Tababar Xirfadeedka
3) Waaxda Abaabulka, Arrimaha Bulshadda & Caymiska.
4) Waaxda Dinwaangalinta, Shuruucda iyo Heshiisyada

## Qodobka 16[aad]
## Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad

Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad wuxuu si toos ah uga mas'uul yahay Guddoomiyaha UDHIS, waxaana hoos yimaada Waaxyaha hoos ku xusan, asagoo u wakiilanayo Xoghayaha Joogtada ee UDHIS, oo ay mas'uuliyadiisa tahay inuu isku agaasimo dhammaan Waaxyahaas, oo kala ah:

1) Waaxda Qorsheeynta & Suuq-geynta.
2) Waaxda Maamulka iyo Maaliyada, Shaqaalaha & Amaahda.
3) Waaxda Dib-u-dejinta iyo Taakuleynta.
4) Wakaaladaha hoos yimaada UDHIS.
5) Shirkadaha Maal-gelinta ee UDHIS la wadaago faa'iidada.

## Qodobka 17[aad]
## Xoghayaha Joogtada

1. Xoghayaha Joogtada ee Ururka UDHIS waa madaxa iyo isku-xiraha maamul ee ugu sarreeya Ururka. Wuxuu si joogta ah ula socdaa, kana hawl-galaa shaqo kasta ama xaalad kasta ee ku soo kororta Ururka, asagoo talooyin ururꞩan iyo daraasaad ka sameynaya hawl-maalmeedka ka socda qeybaha kala duwan ee Ururka, isla markaana ay tahay inuu warbixino joogta ah uu siiyo Guddoomiyaha iyo labadiisa Guddoomiye Ku-xigeeno.

2. Xoghayaha Joogtada, si uu u guto waajibaadka balaaran ee hor yaala, wuxuu asagana ka helayaa warbixino iyo wada-shaqeyn joogta ah Waaxyaha Ururka. Waaxyahaas oo kala ah:

b) Waaxda Arrimaha Dibadda;
t) Waaxda Waxbarashadda iyo Tababar-xirfadeedka;
j) Waaxda Abaabulka, Arrimaha Bulshadda & Caymiska;
x) Waaxda Diiwaan-gelinta, Shuruucda iyo Heshiisyada;
kh)Waaxda Qorsheynta & Suuq-geynta;
d) Waaxda Maamulka iyo Maaliyadda, Shaqaalaha & Amaahda;
r) Waaxda Dib-u-dejinta iyo Taakuleynta;
s) Wakaaladaha hoos yimaada UDHIS; iyo
sh) Shirkadaha Maal-gelinta ee UDHIS la wadaago faa'iidada.

3. Xoghayaha Joogtada wuxuu kormeerayaa hab-sami-u-socodka iyo hawlaha horyaala Agaasimayaasha Waaxyaha, wuxuu ka soo diyaarinayaa warnixino dhaliilaya ama amaanaya wax-qabadkooda, si markaa ay labada Guddoomiye Ku-xigeeno ay talaabo kaga qaadaan Waaxyahaas ee ayaga hoos yimaada, isla markaana ay kala tashadaan Guddoomiyaha UDHIS, haddii ay timaado in talaabo wadajir ah ay ka wada qaadaan xaaladaas.

4. Xoghayaha Joogtada wuxuu gooni gooni ama si wadajir ah ula shirayaa Agaasimayaasha Waaxyaha, si ay u siiyaan warbixinadda hawl-maalmeedyada ay ku hawlan yihiin.

5. Xoghayaha Joogtada wuxuu yeelan karaa Xoghayn iyo kaaliye. Markuu Xafiiskiisa kaga maqan yahay xaalad caafimaad, ama safar dibadda ah, waxaa Kusime uga noqonaya Xafiiskiisa Agaasimaha Waaxda Maamulka Maaliyada, Shaqaalaha & Amaahda.

## Qodobka 18aad
## Waaxda Arrimaha Dibadda

Agaasimaha Waaxda Arrimaha Dibadda wuxuu madax ka yahay Waaxdiisa, wuxuuna mas'uul uga yahay Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad iyo Xoghayaha Joogtada ee UDHIS, waxaana hoos yimaad:

b) Waaxda Hab-Maamuuska; iyo

t) Waaxda Xiriirka caalamiga & Deeqaha.

b) **Waaxda Hab-Maamuuska:**

i) Soo-dhaweynta iyo marti-gelinta wufuuda dibadda ka timaado;

ii) Diyaarinta dokumintiga xubnaha Iskaashatooyinka marka ay dibadda u baxayaan;

iii) Diyaarinta barmaamijyada wufuuda dibadda ee soo booqata UDHIS; iyo

iv) Isku-dubaridka heshiisyada uu UDHIS la gelayo wufuuda;

t) **Waaxda Xiriirka Caalamiga & Deeqaha:**

i) U-raadinta Iskaashatooyinka deeqaha caalamiga ah;

ii) Hagaajinta xiriirka iyo wax-wada-qabsiga ee Hay'adaha Caalamiga, Ururada Iskaashatooyinka ee dalalka kale iyo UDHIS;

iii) Daba-galka mashruucyada Iskaashatooyinka ee loo doonayo deeq caalami ah, iyadoo lala kaashanayo Wasaaradda Qorsheynta iyo Iskaashiga Caalamiga ee dalka;

iv) Qaban-qaabinta booqashooyinka dalalka aduunka, si loo hagaajiyo saaxiibtinimada iyo ka-faa'iideysiga waayo-aragnimadda Iskaashatooyinka caalamka;

v) Raadinta shirarka iyo seminaarada dalka dibadiisa iyo isku-duwida ka qeyb-galkooda; iyo

vi) In Deeqo waxbarasho loo helo shaqaalaha, xubnaha Iskaashatooyinka si sare loogu qaado aqoontooda.

**Qodobka 19aad**

**Waaxda Abaabulka, Arrimaha Bulshadda & Caymiska**

Agaasimaha Waaxda Abaabulka, Arrimaha Bulshadda iyo Caymiska wuxuu madax ka yahay Waaxdiisa, wuxuuna mas'uul uga yahay Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad iyo Xoghyaha Joogtada. Hawlahiisuna waxay yihiin:

b) Abaabulka isku-xirka Guddiga Qaranka, gobolada & degmooyinka;

t) In uu ka shaqeeyo isku-xirka Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed, kana warqabo baahidooda si joogto ah;

j) Sare-u-qaadIda heerka aqoon ee xubnaha iskaashatooyinka xagga Isboortiga, Fanka, Hidaha iyo Dhaqanka, iyo abuurista kooxo arrimahaa ka haw-Igala;

x) Dhiirri-gelinta xubnaha iskaashatooyinka inay ka qeyb-galaan wax-soo-saarka guud iyo kan Iskaa-wax-u-qabso;

kh) Diyaarinta Bog Internet (Qeybta IT'da), faafinta iyo Abaabulka Idaacad & Wargeysyo ku soo baxa codka Iskaashatooyinka si xubnaha Iskaashatooyinka ula socdaan dhaqdhaqaaqa Ururada iyo Iskaashatooyinka dalka iyo Aduunka;

d) In uu baro, kana taxadaro xubnaha Iskaashatooyinka sida ay ku ilaalin lahaayeen caafimaadkooda, hantidooda, beerahooda, gaadiidkooda, warshadahooda, iwm, isla markaana ka wacyi-geliyo dariiqyada ugu haboon ee ay ku badbaadin karaan; iyo

r) Diiwaan-gelinta Caymiska caafimaadkooda, hantidooda, beerahooda, gaadiidkooda, warshadahooda, iwm, si xubnaha Iskaashatooyinka ay ula jaan-qaadaan uguna tiirsanaadaan Caymiska Iskaashatooyin aduunka oo dhammaan ku jirta caymis.

## Qodobka 20[aad]

## Waaxda Waxbarashada &Tababar-xirfadeedka

Agaasimaha Waaxda Waxbarashada Tababar-xirfadeedka wuxuu madax ka yahay Waaxdiisa, wuxuuna mas'uul uga yahay Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad iyo Xoghayaha Joogtada, waxaana hoos yimaad 2 (labo) Qeybood, wuxuuna yeelanayaa labo kaaliye oo Mas'uul ka noqda labadaas Qeybood:

1. Qeybta Waxbarashadda; iyo
2. Qeybta Tababar-xirfadeedka.

1. **Waaxda Waxbarashadda:**

b) Ciribtirka jahliga iyo baabi'inta akhris iyo qoris la'aanta ee dhammaan xubnaha iskaashatooyinka dalka;

t) Horumarinta waxbarashadda xubnaha Iskaashatooyinka & Ururada;
j) Qaban-qaabinta doodo iyo aqoon-isweydaarsiyo ee dhexmara xubnaha Iskaashatooyinka iyo Ururadda; iyo
x) Diyaarinta Seminaaro iyo tababar-xirfadeedyo 'workshops' ee kor loogu qaadayo maamul-wanaaga Iskaashatooyinka kaasoo la'aantiisa aan la gaari karin isku filnaansho dhinaca aqoonta.

2. **Qeybta Tababar-xirfadeedka:**

b) Qaban-qaabada seminaaro iyo tababaro kor loogu qaadayo xirfadaha xubnaha Guddiyada iyo Urrurada Iskaashatooyinka; iyo
t) Fidinta khibradaha iyo fikradaha casriga ah ee aduunka laga helo si ay xubnaha Iskaashatooyinka u fahmaan ahmiyada farsamooyinka cusub iyo qiimaha waxbarashada iyo aqoon-kororsigu leeyahay.

## Qodobka 21aad

## Waaxda Diiwaan-gelinta, Shuruucda iyo Heshiisyada

Agaasimaha Waaxda Diiwaan-gelinta, Shuruucda iyo Heshiisyada, wuxuu madax ka yahay Waaxdiisa, wuxuuna mas'uul uga yahay Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad iyo Xoghayaha Joogtada. Waaxdana waxaa hoos yimaada laba Qeybood, oo yeelanaya labo kaaliye. Waaxdan, marka laga soo tago Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad, waxay kaloo, talaabo kasta ay qaadayso ee dhinaca shuruucda iyo heshiisyada, ay tahay inay la-tashato Madaxa Guddiga Dastuurka iyo Xallinta Khilaafaadka, kaasoo haya dhammaan Sharciyada, Dastuurka guud ee Ururka iyo keydka xeer-hosaadyada, si uusan khilaaf u imaanin:

1. Qeybta Diiwaan-gelinta; iyo
2. Qeybta Shuruucda iyo Heshiisyada.

1. **Qeybta Diiwaan-gelinta:**

b) Inay diiwaan-geliso dhammaan Iskaashatooyinka iyo Ururadooda;
t) Inay siiso shahaadada Diiwaan-gelinta dhammaan Iskaashatooyinka iyo Ururada Iskaashatooyinka la diiwaan-geliyey; iyo
j) Inay ku qorto diiwaan u gaar ah nooc kasta oo Iskaashatooyinka kala duwan.

Diiwaanku waa in ay ka muuqdaan:

i. Taariikhda diiwaan-gelinta;
ii. Magaca Iskaashatada;
iii. Meesha ay ka dhisan tahay;
iv. Xirfada Iskaashatada;
v. Tirada Xubnaha ka ah Iskaashatada; iyo
vi. Magaca & saxiixa qofka diiwaan-geliyey.

2. Qeybta Shuruucda & Heshiisyada:

b) Diyaarinta iyo la-socodka sharciyada saameynta ku leh dhammaan iskaashatooyinka hoos yimaada Ururka UDHIS;

t) In ay kala tashato Guddiga Dastuurka iyo Xallinta Khilaafaadka xagga sharciyada Iskaashatooyinka iyo Ururada, isla markaana ay soo gudbiso talooyinka iyo warbixinada toddobaadlaha ah ee sharciga;

j) Inay hubiso, ayna diwaan-geliso dhammaan heshiisyada uu UDHIS, Ururada iyo Iskaashatooyinka ay galaan in ay waafaqsan yihiin Dastuurka Ururka UDHIS, sharciyada dalka u degsan, iyo kan caalamiga ah;

x) Inay xiriir iyo la-tashi la yeelato Hay'adaha Shuruucda sida- Golaha Shacabka, Garyaqaanka Guud ee dawladda iyo Qeybaha kale;

kh) In ay xiriir joogta ah ah la yeelato Guddiga Dastuurka si wadajir ahna ay uga wada munaaqashoodaan wixii is-bedel lagu sameynayo Xeer-nidaamiyeyaasha sharciga Ururka iyo in uu la saan-qaadi karo sharciyada Ururada kale ee caalamka.

## Qodobka 22aad

## Waaxda Qorsheynta, Tiro-koobka & Suuq-geynta

Agaasimaha Waaxda Qorsheynta & Suuq-geynta wuxuu madax u yahay Waaxdiisa, wuxuuna mas'uul uga yahay Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad iyo Xoghayaha Joogtada ee UDHIS. Waaxdiisa waxay ka kooban tahay labo Qeybood, waxayna yeelaneysaa labo kaaliye:

1. Qeybta Qorshaha & Tiro Koobka; iyo
2. Qeybta Suuq-geynta.

1. **Qeybta Qorshaha iyo Tiro-Koobka:**

b) In uu qorsheeyo, uuna baaro, isla markaana uu habeeyo qaabka loo fulinayo bamaamijyada UDHIS, asagoo la kaashanaya Ururada iyo Iskaashatooyinka;

t) In uu tiro-koobo qeybaha ay Iskaashatooyinka ka kooban yihiin, isla markaana uu diiwaan-geliyo tirada hoos timaada ee gawaarida, beeraha, kawaanada kalluunka iyo hilibka, doomaha, warshadaha, iwm;

j) In uu sahmiyo, baarisna ku sameeyo habka maal-gelinta mashaariicda iyo asagoo eegaya, sida degaan ahaan u kala haboon yihiin;

x) In uu qorsheeyo mashaariicda muddada dheer iyo muddada dhow, uuna baaris-cilmiyeed ku sameeyo habka ugu sahlan ee loo warshadeyn karo badeecadaha Iskaashatooyinka ay soo saaraan iyadoo laga faa'iideysanayo tiknoolijiyada cusub;

kh) In uu caawiyo, uuna kala taliyo Iskaashatooyinka sida ay u xulan lahaayeen mashruucyada loo baahan yahay;

d) In uu ka diyaariyo warbixino ku saabsan mashaariicda gacanta lagu hayo;

r) Inuu sameeyo tiro-koob guud iyo kuwa gaar ahaaneed, uuna dhuuxid ku sameeyo mashaariicada ay fuliyaan Iskaashatooyinka;

s) In uu la socdo arrimaha saameeya tacabka, wax-soo-saarka & habeynta shaqada; iyo

sh) In uu u sahlo Iskaashatooyinka sidii ay u heli lahaayeen qalabyada kala duwan ee wax-soo-saarka.

2. **Qeybta Suuq-geynta:**

b) In uu qorsheeyo suuq-geynta badeecooyinka ay soo saaraan Iskaashatooyinka;

t) In uu u raadiyo, daraasaadna uu ku sameeyo suuqyada ku haboon badeecadaha ay soo saaraan iskaashatooyinka;

j) In uu qaban-qaabiyo, habeeyana ka qeyb-galka bandhigyada iyo carwooyinka dalka iyo dibaddaba lagu qabto; iyo

x) In uu ku dhiirri-geliyo Ururada & Iskaashatooyinka si ay uga qeyb-qaataan carwooyinka caalamiga ah.

## Qodobka 23aad
## Waaxda Maamulka Maaliyadda, Shaqaalaha & Amaahda

Agaasimaha Waaxda Maamulka Maaliyada, Shaqaalaha iyo Amaahda wuxuu madax ka yahay Waaxdiisa, wuxuuna mas'uul uga yahay Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad iyo Xoghayaha Joogtada ee UDHIS. Waaxdan waxay leedahay 3 (saddex) Qeybood oo kala ah:

1. Qeybta Xisaabaadka & Miisaaniyadda;
2. Qeybta Maamulka & Shaqaalaha; iyo
3. Qeybta Amaahda.

1. **Qeybta Xisaabaadka & Miisaaniyadda:**

b) Ururinta & Keydinta Dakhliga Guud ee Ururka;
t) Diyaarinta Xisaabaadka Dakhliga & Kharashka; iyo
j) Diyaarinta Miisaaniyadda U.DH.I.S.

2. **Maamulka &Shaqaalaha:**

b) Faafinta ama gaarsiinta go'aanadda UDHIS Ururadda Iskaashatooyinka gobolada & degmooyinka dalka;
t) Ururinta, keydinta, meeleynta & habeynta galalka Ururadda Iskaashatooyinka, Qoraalada & dukumintiyada Guddiga Fulinta iyo Guddiga Qaranka;
j) Diiwaan-gelinta, dayactirka iyo xanaaneynta hantida UDHIS;

x) Diiwaan-gelinta shaqaalaha, mushaar-siinta & xaquuq-bixinta; iyo
kh)Habeynta dhismayaalka, maktabada iyo dhammaan hantida (guurtada iyo ma-guurtada) ee UDHIS.

3. **Qeybta Amaahda:**

b) U-raadinta Iskaashatooyinka Hay'adaha amaahda bixiya ee laga aqoonsan yahay dalka gudahiisa;
t) U-qeybinta Iskaashatooyinka amaahda, ayadoo la tixgelinayo baahidda Iskaashatada, xeerarka iyo heshiisyada amaah-bixinta;

j) Dib-uga-soo-celinta amaahda la siiyay iskaashatooyinka iyadoo la tixgelinayo Qaynuunka & Heshiiska amaah-soo-celinta;
x) Hubinta in amaahda la siiyey Iskaashatada ay u isticmaaleyso sida uu Dhigayo Xeerka iyo Heshiiska amaah-bixinta;
Kh)Waaxdan, marka laga soo tago Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad oo ay hoos timaado, waxay kaloo la shaqeyn doontaa Bankiga Keydka iyo Amaahda ee Ururka UDHIS, oo hoos imaanaya Guddoomiyaha UDHIS. Bankigaas oo horey loo sharciyeeyey ayaa misena waxaa loo diyaarin doonaa Xeer-nidaamiye cusub, ee uu Guddiga Dastuurka UDHIS uu ka hawl-geli doono, soona bandhigi doona Shirweynaha Urrurka ee soo socda.

**Qodobka 24aad**
**Waaxda Dib-u-dejinta iyo Taakuleynta**

Agaasimaha Waaxda Dib-u-dejinta iyo Taakuleynta wuxuu madax ka yahay Waaxdiisa, wuxuuna mas'uul uga yahay Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad iyo Xoghayaha Joogtada ee UDHIS. Waaxayna Waaxdani yeelaneysaa 2 (labo) Qeybood iyo 2 (labo) kaaliye:

1. Qeybta Dib-u-dejinta; iyo
2. Qeybta Taakuleynta.

1. **Qeybta Dib-u-dejinta:**

b) Waxay Dib-u-dejin u sameyneysaa xubnaha Iskaashatooyinka ee ka soo barakacay deganadooda;
t) Waxay u diyaarineysaa beeraleyda soo barakacay mucaawino, qorshayaal ay dib ugu celinayso beerahooda, iyo Qalabka wax-soo-saarka;
j) In ay xaqiijiso, oo ayna hubsato yoolkooda wax-soo-saarsida dhul-beereedka ay tacban jireen iyo baahida ay qabaan markaa;
x) Waxay u diyaarineysaa xoolo-dhaqatada soo barakacay ee Iskaashatooyinka ah aduun Xoolo; iyo
Kh)Waxay u diyaarineysaa kalluumeysatada soo barakacay shabaagyo, doonyo, qaboojiyayaal, tababaro kalluumeysi, iwm.

2. **Qeybta Taakuleynta:**

b) Waxay gacan ka siinaysaa Iskaashatooyinka horumarinta beeraha ay tacban lahaayeen sida dhul-diyaarinta, geed-gaadista, abuur-bixinta, bacrinta dhulka, sunta cayayaanka, iwm; iyo

t) Waxay ka taakulaynaysaa beerleyda, xoolaleyda, Kalluumeysatada iyo Iskaashatooyinka kaleba arrimaha- guryeynta, daawada, waxbarshada iyo baahiyaha kale.

## Qodobka 25aad
## Wakaaladaha Hoos yimaada UDHIS

Wakaaladdaha Hoos yimaada Ururka DHaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed waxay si toos ah u hoos tagaan Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad, waxayna dhinaca maamulka si joogta ah ula shaqeynahsaa Xafiiska Xoghayaha Joogtada ee UDHIS:

1. Wakaaladaha UDHIS hoos yimaado waxay leeyihiin sharciyad u gaar ah, waxaana Xeer-hoosaadkooda lagala tashanayaa Guddiga Dastuurka.

2. Wakaaladaha waxay kala tashanayaan xagga maamulka iyo Dhaqaalaha Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad ee UDHIS, oo isagu qaabilsan.

3. Kormeeridda Hantida Wakaaladaha ee hoos yimaada UDHIS waxaa iska leh Guddiga Kormeerka & Hanti-dhawrka UDHIS.

## Qodobka 26aad
## Shirkadaha Maal-gelintooda Wadajirka yahay

1. Shirkadaha ay maal-gelintooda wadajirka yahay waxay ku dhaqmayaan Heshiisyada ay sameysteen, waxaana lagala tashanayaa Guddiga Dastuurka UDHIS.

2. Shirkadahaasi waxay si toos ah ula socodsiinayaan dhaqdhaqaaqooda maaliyadeed Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad iyo Guddoomiyaha UDHIS.

## Qodobka 27aad
## Guddiga Kormeerka & Hanti-dhawrka

Xilka iyo waajibaadka Guddiga Kormeerka iyo Hanti-dhawrka Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed waxay yihiin sida hoos ku qoran:

1) In uu kormeero, uuna baaro hawlaha Iskaashatooyinka oo dhan, wuxuuna hubinayaa in hawlaha Iskaashatooyinka loo fulinayo sida waafaqsan Dastuurka, xeer-hoosaadyada iyo barnaamijyada UDHIS.
2) Wuxuu kala yeelanayaa la-tashi dhinaca sharciga Guddiga Dastuurka.
3) Guddigu wuxuu kormeerayaa sidii ay u fuleen go'aanada Shirweynaha iyo Guddiga Qaranka.
4) In uu baaro dacwadaha ka dhex-dhasha Iskaashatooyinka xubnahooda, wuxuuna warbixintiisa marka hore uu kala tashanayaa Guddiga Dastuurka iyo Xallinta Khilaafaadka dhinaca Xeerarka u degsan Ururka, kadibna wuxuu u gudbinayaa Guddiga Fulinta.
5) Inuu baaro, go'aanana uu ka gaaro cabashadda Xubnaha iskaashatada.
6) in dacwad uu ku oogo qof kasta ee ku takri-fala, ama ku xad-gudba ama dayaca hantidda Ururada, Iskaashatooyinka, iwm.
7) inuu baaro dukumenti kasta oo ku lug leh iskaashatooyinka uuna siiyo awaamir iyo digniino hawlaha toosinta u baahan.
8) in uu xaafiiskiisa ugu yeerto xubin kasta ee Iskaashatooyinka kamid ah, si uu wax uga weydiiyo arrimaha markaa jira ee la xariir hawlahooda.
9) in uu helo nuqul kamid ah miisaaniyadda ururada iyo iskaashatooyinka.
10) Go'aanka Guddiga Kormeerka iyo Hanti-dhawrka waxaa racfaan looga qaadanayaa Guddiga Fulinta UDHIS.

## Qodobka 28[aad]
## Faa'iidada U.DH.I.S.

Marka laga bixiyo kharajka wixii saafi ah ee ka soo hara dakhliga UDHIS waxaa loo qeybinayaa sida soo socoto:

1. Sanduuqa Maal-gelinta........40%
2. Sanduuqa Keydka .............20%
3. Sanduuqa Bulshadda .........15%
4. Sanduuqa Horumarinta ........25%

**1. Sanduuqa Maal-gelinta:**

Sanduuqa maal-gelinta waxaa loo isticmaalyaa dhismaha, guryaha, qalabka, gaadiidka, dhaqdhaqaaqa ganacsi, iwm.

**2. Sanduuqa Keydka:**

Sanduuqa Keydka waxaa lagu isticmaalayaa in lagu bixiyo kharashka UDHIS ama gacansiga ee uu sameeyo haddii loo baahdo.

**3. Sanduuqa Bulshadda:**

Sanduuqa Bulshadda waxaa loo isticmaalaa

b) Waxbarashadda;
t) Caafimaadka;
j) Hidaha & Dhaqanka;
x) Isboortiga;
kh)Iskaa-wax-u-qabso; iyo
d) Abaal-marinta

**4. Sanduuqa Horumarinta**

Sanduuqa Horumarinta Iskaashatooyinka waxaa loo isticmalayaa kaalmeynta Iskaashatooyinka ee la kulma dhibaatooyinka dhaqaale ama ka-taakuleynta xagga farsamada, iwm.

## Qodobka 29aad
## Abaal-gud

Abaal-gud waxa loola jeedaa abaal-marinta uu bixiyo Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskashatooyinka Soomaaliyeed, laguna muteysan karo tartan la xiriira wax-soo-saarka, hawl-karnimo, wadaninimo, xil-kasnimo, iyo firfircooni dheeraad ah. Abaal-gudyadu waxay u kala baxayaan:

1. **Calanka UDHIS.**

Ururka, Iskaashatada, xubintii ama qoftii ku guulaysata calanka UDHIS waxay xaq u leeyihiin in ay helaan tixgelin iyo qadarin gaar ah.

2. **Billada UDHIS**

b) Ururka ama Iskaashatada, xubintii ama qoftii la siiyo Billada UDHIS waxay xaq u leeyihiln tixgelin gaar ahaaneed, oo markaas la bixinayo deeqda waxbarasho iyo tababar-xirfadeed; iyo

t) Qofka la siiyo Billada UDHIS wuxuu xaq u leeyahay in la siiyo tixgelin gaar ahaaneed ama qiima-dhimis hoteeladda iyo Gaadiidka ay leeyihiin Iskaashatooyinka nooc kasta ha ahaadeen.

3. **Shahaadooyin Sharafta UDHIS:**

Iskaashato ama qofka la siiyo shahaado sharaf waxay xaq u leeyihiin deeq waxbarsho, tababaro-xirfadeed, xarumaha nasashada iyo fursadaha shaqada ee uu ururku bixiyo.

4. **Abaalgudyo kale ee UDHIS:**

Abaal-gudyo kale oo ka kooban lacag, qalab, dalacaad, iwm. ayaa Ururku bixin doonaa.

## Qodobka 30aad
## Dhismaha Bankiga Iskaashatooyinka iyo Caymiska Xubnaha Iskaashatooyinka ee ku bahoobay Ururka UDHIS

1. Ururka UDHIS markuu eegay xaaladaha Iskaashatooyinka, isla markaana uu muddo dheer baaris ku sameeyey baahida baaxada

weyn oo ay qabaan Iskaashatooyinka Ururka UDHIS, oo ah in ay helaan nidaam caddaan (transparent) ah, oo ay ku keydsan karaan Dhakligooda ama ku qaadan karaan Amaah – Ururka UDHIS wuxuu go'aansaday inuu dib-u-dhis ku sameeyo Bankigii Iskaashatooyinka ee Keydka iyo Amaahda.

2. Ururka UDHIS, isagoo ka taxadarya sidii ay xubnihiisa Iskaashatooyinka ay ku caymin lahaayeen caafimaadkooda, hantidooda, beerahooda, gaadiidkooda, warshadahooda, iwm; isagoo Ururka, isla markaanaka ka wacyi-geliya xubnihiisa dariiqyada ugu haboon ay ku badbaadin karaan, iskana diiwaan-gelin karaan Caymis ay Iskaashatadu leedahay, sida Caymisyada Iskaashatooyinka Aduunka ka jira, oo dhammaan xubnaha Ishaashatooyinka ay tahay in ay ku jiraan caymis.

3. Ururka UDHIS, isagoo cuksanaya labadii Sharci ee ugu dambeeyey ee noqday tiirarka uu ku dhisan yahay Ururka ee (Sharci Lr.41, ee 08.10.1979 iyo Sharci Lr.9, ee 29 Maarso 1980 – L.2R3), kuwaasoo si fiican u qeexaya 'in uu Ururku leeyahay shakhsiyad sharciyeed oo si madax-bannaan uu Ururku ku horumarin karo Xeerarka u yaala, kuna kordhin karo Xeerar-hoosaadyo kaabaya ama wada daboolaya baahida ku soo kororta Ururka'.

## Qodobka 31aad

## DHAQAN-GAL

Qaab-siyaasadeedkani wuxuu dhaqan-gal noqonayaa marka uu meel-mariyo **Golaha Wasiirrada**, isla markaana uu Dikreeto ku soo saaro **Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.